



Cagaarshow nooca A

- > Cagaarshow nooca A waa fayras/virus laga qaado cuntada iyo biyaha
- > Qofka qaba cagaarshow nooca A wuxuu sii qaadiin karaa dad kale
- > Talaal baa ugu fiican sida la isaga ilaalin karo.



Cagaarshow nooca A wuxuu sababaa caabuq ah beerka

Qofka qaada cagaarshow nooca A waxaa ku dhici kara calool xanuun, xumad, shuban wuxuuna qofku dareemayaa inuu buko iyo daal. Dadka qaar ku dhaco cagaarshowga jirka iyo isha inta cad ayaa jaale noqda




Talaalku waa difaac

Talaalka waxa la siiyaa badanaa marka laga bilaabo da'da 1 sano jir. Dawada ugu horeysa waxay difaacaysaa ilaa hal sano. Dawada labaadna ilaa 20 sano.

Cagaarshowga nooca A wuxuu badanaa ka jiraa qaybo badan oo ah dunida

Talaal ayaa lagula talinayaa dadka oo dhan ee u safraya meelaha cagaarshowga nooca A uu badanaa ka jiro. Waxaad iska talaali karaysaa meelo badan oo ah xarumaha caafimaadka (vårdcentraler) ama xarumaha la iska talaalo (vaccinationsmottagning).



Meelaha khatarta cagaarshowga A ka jirto.
Xogta: WHO